Tilmaamaha Isticmaalka Iimaylka Ammaan ah ee DCYF ee Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta

DCYF waxay isticmaashaa nidaam email oo ammaan ah, si ay u ilaaliso farriimaha email-ka iyo faylasha ku lifaaqan ee ay soo diraan bixiyeyaasha daryeelka carruurta.

Marka aad email u dirto providerhelp@dcyf.wa.gov, waxaad heli doontaa jawaab otomaatig ah oo ay ku jiraan tilmaamaha sida loo diro email ammaan ah.

Raac tallaabooyinka hoose si aad email-kaaga ugu dirto si ammaan ah oo aad u xaqiijiso in DCYF ay heshay.

Tallaabada 1-aad: Email u dir DCYF

Iimayl u dir providerhelp@dcyf.wa.gov.

Waxaad heli doontaa jawaab otomaatig ah oo cinwaankeedu yahay “DCYF Secure Provider Email.” Jawaabtaas waxaa ku jiri doona tilmaamo ku saabsan sida loo isticmaalo nidaamka iimaylka ammaan ah.

Tallaabada 2-aad: Raac tilmaamaha adeegga iimaylkaaga

Tallaabooyinku waxay ku xiran yihiin adeegga iimaylka aad isticmaasho.

Haddii aad isticmaasho Outlook.com, Hotmail.com, Live.com ama MSN.com:

1. Ka jawaab iimaylka otomaatiga ah ee DCYF kuu soo dirtay.
2. Sug iimayl xaqiijin ah oo ka yimaada DCYF. Iimaylkan wuxuu kuu xaqiijinayaa in DCYF ay heshay farriintaada oo ay hadda ka shaqaynayso.

Haddii aad isticmaasho adeeg iimayl oo kale, sida Gmail ama Yahoo:

Raac tallaabooyinkan 30 maalmood gudahood laga bilaabo marka aad hesho jawaabta otomaatiga ah.

1. Fur jawaabta otomaatiga ah ee DCYF kuu soo dirtay. Guji batoonka buluugga ah ee **“Akhriso Fariinta”**.
2. Bogga galitaanka, dooro **“Ku gal koodh hal mar la isticmaalo.”**
3. Ka hubi iimaylkaaga koodhka laguu soo diray.
4. Geli koodhka si aad u furto iimaylka ammaan ah ugana jawaabto.
5. Sug iimayl xaqiijin ah oo ka yimaada DCYF. Iimaylkan wuxuu kuu xaqiijinayaa in DCYF ay heshay farriintaada oo ay hadda ka shaqaynayso.

Tallaabada 3: Hubi iimaylka xaqiijinta

Marka aad dhammaystirto tallaabooyinka adeeggaaga iimaylka, DCYF waxay kuu soo diri doontaa jawaab otomaatig ah.

- **Haddii DCYF ay heshay iimaylkaaga:** Jawaabtu waxay kuu xaqiijin doontaa in DCYF ay heshay iimaylkaaga oo ay hadda ka shaqaynayso.
- **Haddii ay dhibaato jirto:** Jawaabtu waxay kuu sheegi doontaa dhibaatada iyo waxa aad u baahan tahay inaad samayso.

Raac tilmaamaha ku jira jawaabta si aad u xalliso dhibaato kasta oo la xiriirta iimaylkaaga ama faylasha aad ku lifaaqday.

Tallaabada 4: Diyaari dukumentiyada aad ku lifaaqayso

Raac tilmaamahan si DCYF ay u hesho iimaylkaaga iyo dukumentiyadaada, ugana shaqayso:

- **Ka jawaab iimaylka saxda ah.** Marka aad DCYF u jawaabayso, raadi iimaylka cinwaankiisu yahay **"Provider Help Access."** Ka jawaab iimaylkaas si farriintaadu u ahaato mid ammaan ah.
- **Ku lifaaq dukumentiyadaada.** Dukumentiyada ku lifaaq iimaylka. Ha ku dhex qorin ama ha ku koobiyeeyn farriinta iimaylka.
- **Hubi dukumentiyadaada.** Hubi in bog kasta oo dukumentiyadaadu yahay mid cad oo si fudud loo akhrisan karo.
- **Isticmaal nooca faylka la aqbalo.** DCYF waxay aqbashaa noocyada faylasha soo socda: TIF, TIFF, JPG, BMP, PNG, DOC, DOCX iyo PDF.
- **Ku qor lambarkaaga aqoonsiga bixiyaha SSPS.** Lambarkaaga ku qor bog kasta oo dukumentiyada aad dirayso ah.

Ma u baahan tahay caawimaad?

Wac Xarunta Xiriirka Kaalmada Kharashka Daryeelka Carruurta (Child Care Subsidy Contact Center) lambarka **800-394-4571**.

Saacadaha shaqada: Isniinta ilaa Jimcaha, 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo.